ALLIANCE
ACTion
INFORMATION SHEETS

Qiimeynta Dabeecadda Aassaasiga iyo Dhexdhexaadinta Wanaagsan: Waxyaabaha Waalidku u Baahan Yahay in ay Ogaadaan

Functional Behavioral Assessment and Positive Interventions: What parents Need to Know—Somali version

Ilma badan waxey leeyihiin akhlaaq darro oo ay u geenayso laxaad la'aan ama karti darro xagga caafimaadka ah. Dabeecad darradu waxay ilmaha ku kaliftaa waxbarasho xumo, dhibaato uu isu geysto ama ilmaha kale u geysto, ama ka takoortaaba ilmaha kale ee la faca ah. Ilmaha qaarkood waxey leeyihiin cillad maskaxda ah ee loo yaqaan Tourette Syndrom taasoo ah dubaaxis/bood-boodka murqaha ee iqtiyaar la'aanta ah oo aysan ka adkeen (tics) amaba ay iyagu wax isu geystaan. Ilmaha qaarkood waxey noqdaan madluun ama si sahlan ayey u didaan. Qaarkood ma aysan baran si wanaagsan oo ay ku xiriiraan si ay u helaan waxa ay u baahanyihiin. Arimahaa kor ku xusan oo idil daradood, dabeecadda uma ogolaaneyso in ay yeeshaan kartidi ay ku baran lahayeen xirfad ay horumar ku gaaraan.

Waan bari karnaa ilmaha in ay yeeshaan karti akhlaaq mudan, laakiin marka hore waa in aan fahamnaa akhlaaq darrada halkey ka timaado iyo sababta uu ilmahu ula jeedo. Habka lagu barto sababta u keenta ilmaha dabeecad darada waxaa loo yaqaan ***functional behavioral assessment (FBA)*** Qiimeynta Dabeecadda Aassaasiga ah. Haddaan darasno dabeecadaha xun, halka ay ka yimaaddaan iyo sababta uu ugu kacayo, waxaan qorsheyn karnaa in aan helno tab looga hor tago oo aan barno kuwo wanaagsan. Tabtaa la raaco waxaa loo yaqaan ***positive behavioral interventions*** Dhexdhexaadinta akhlaaq wanaagga. Baraha iyo waalidkaba waxay raaci karaan macluumaadka ay farayso qiimeynta dabeecadda aassaasiga (FBA) si eey u caawiyaan ilmaha in uu barto xirfad cusub. Goolku waa in ilmaha la baro sidey u maamuli lahaayeen dabeecadooda.

Arigtidan guud waxay waalidka ka caawisaa iney fahmaan dhexdhexaadinta akhlaaq wanaagga iyo qiimeynta dabeecadda aassaasiga. Waalidku door weyn ayuu ku leeyahay qiimeeynta, waayo sida aad uga war hayso ilmahaaga cid kale ugama war hayso. Markaad fahamto habka loo qabto hawsha, waxaad si karti leh ula shaqeyn kartaa kooxda qorsheynta. Waxaad leedahay aqoonti aad ku gaari laheyd go'aan marka lagaa codsado in ilmahaaga laga qiimeeyo dabeecadda aassaasiga. Warbixinta aad ka dhiibeyso ilmahaaga waxay caawinaysaa in loo helo ilmahaaga waddo mar ku haboon.

Ka fikirka ilmahaaga

Dadka waaweyn inta badan laba nooc ayey ula dhaqmaan ilmaha adaabta xun. Labadan nooc ee kala duwan waxay leeyihiin labo fikradood ee kala duwan. Mid waa dad u fikira in ay ilmuhu dhibka yihiin, midna waa dad ku fikira in ay ilmahu dhibban yihiin.

Midda ilmuhu dhibka yihiin

Billy waa arday labo iyo toban jir ah ee fasalka lixaad dhigta. Wuu diidan yahay in uu hawshi dugsiga qabto, barahuna ma garanayo wax uu qabto. Markuu baraha xasuusiyo in uu ku dhaqaaqo howshi laga doonayey, Billy wuu xanaaqayaa, wuu qeylinayaa, wuu caytamayaa oo waxuu tuurayaa bugaagta si barahu faraha uga qaado. Waxaa laga yabaa in barahu maleynayo in Billy yahay mid caajis badan, ee qof xun ah oo aan ixtiraam leheyn. Waxaa

Technical Assistance ALLIANCE for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org
www.taalliance.org

©2007 PACER Center |

laga yaabaa in barahu xanaaqo ama u yaabo nafsadiisa. Dadka waaweyn marka ay xanaaqaan, waxay xigsadaan ciqaab ama handadaad: Haddaadan waxaan sameyn, tan kaa raacda. Ma ka fikirno in ilmahu u fikiraan si ka duwan sida aan u fikirno. Waxaa laga yabaa in eysan u fikireyn iney wax dhibayaan.

Marka aan ciqaabta ka badino, ilmaha waxey noo arkayaan qof aan dan ka leheyn. Qaarkood cabsi baa galeysa oo waa naga didayaan. Qaarkood waxaa laga yabaa, iney caro ka sii qaadaan oo ay qeylida badiyaan. Ilmaha aan baqeyn marka ay la doodayaan dadka waaweyn, waa kuwa ciqaabta xun ku dhacda. Dad badan waxey aminsanyihiin in aan ilmaha loo ogolaan iney ku guleystaan dood ay waalidka la doodaan. Ilmuhuna marar badan waxay yirahdaan hadalo eysan ula jeedin oo ay caradu ka keeneyso. Waxaa laga yaabaa in eysan ku quus qaadan ciqaabta la ciqaabayo ama dugsiga oo laga ceyriya.

Dadka qaarkood waxey moodaan ka ceyrinta ilmaha laga ceyrinaya dugsiga akhlaaq darro draadeed, in ay dawo u tahay oo ey ku cashar qaadanayaan. In ay ilmuhu joojinayaan akhlaaq darrada. Waxaa dhici karta in ilmahaasu yahay mid dugsi diid ah, oo halkaa waxuu ka baranayaa in mar walbaa oo ay akhlaaq darro ku kacaan, laga joojinaya dugsiga. Dabadeed ilmahaa wuu doonayaa ciqaabtaa.

Midda ilmahu dhibban yihiin.

Billy, 12 jirkii aan horey uga soo hadalnay, waxuu leeyahay dabeecado loo baahan yahay in uu iska bedelo. Aan ka soo qaadno in aan helnay warbixin qiimeyn ah ee noo cadeeyneysa xaalada Billy. Waxaan ogaanay in aqriskiisu la heer yahay fasalka labaad. Waxaan kaloo ogaanay in qof deriska ah falaad xumeeyey markuu ahaa sadex jir. Billy waxuu kaloo ka caroonayaa, kala tegidda ay waalidkiisa kala tagayaan iyo dagaalka ka dhexeeya waalidka cidda isaga korin leheyd. Waxaa walaac kaga jira halka uu ku noolaan doono.

Waxaa noo cad in ay tahay in akhlaaqdiisu is bedesho. Waa mid khatar ah, oo aan u ogoleyn in uu wax barto. Haddaba wax walboon go'aansanno in aan ka bedelno akhlaaqda ilmahaa waa in ay ahaattaa mid ku lug leh xaaladiisa. Waa markaa marka loo baahan yahay qiimeynta dabeecadda aassaasiga si aan Billy uga caawinno xagga waxbarashada. Waxay kaloo naga caawineysaa in aan ogaano sababta uu Billy la walwalaacayo oo uu la careeysan yahay. Halkaa waxaa nooga cad, in uusan qof macquul ah aamini karin in Billy ciqaab keliya horumar ku gaari karin.

Dhexdhexaadinta dabeecad wanaagga

Dhxdhexaadin: joojin ficil socda, kala dhex gelid.
Dabeecad: ficil la muujiya.
Wanaagga: fiicnaan, mid la isku raacay, bandhigga mid la isku raacay.

(Adapted from Merriam Webster's Tenth Collegiate Dictionary.)

Sharcigii 2004 ee Addeegga Waxbarashada Gaarka ee loogu tala galay Dadka Naafada Individuals with Diabilities Education Act (IDEA) waxuu na farayaa:

Hadii ay dabeecaddu iska hor taagayso in lmahu waxbarto, ama ay u ogolaaneyn in ilamaha kale wax ka bartaan, dabadeed waa in ay kooxda qorshaha adeegga waxbarashada gaar ahaaneed qadarisaa in ay isticmaasho dhexdhexaadinta akhlaaq wanaagga iyo siyaabaha kalee caawinaadda ah.

IDEA section 614 (d) Idea qetbta 614 (d)

Dhexdhexaadinta dabeecad wanaagga waxaa la isticmalaa inta aysan dabeecad xumada imaan. Si loo helo dhexdhexaadinta dabeecad wanaagga, kooxdu waa in marka hore fahamtaa sababta u keeneysa ilmaha dabeecad xumada iyo tabta loo maro si loo caawiyo. Waxaa jira siyaabo badan ee dugsigu isticmaalo si loga hor taga ama loo yareeya dabeecad xumada. Bedelid laga bedela halka ilmuhu fariisto, hawlaha dugsiga oo loo bedela, iyadoo lagu dhiira geliya dabeecadda wanaagsan. Macalinka ardayga waxuu kula hadli karaa cod qabooban si ilmahu u dega. Dadka waaweyn waa in ay is dejiyaan marka uu ilmahu careysan yahay. Micnuhu waa in laga hortagaa waxyaabaha ciqaabta u keenaya ilmaha.

Hadaan tusaalo uga soo qaadano: Macalimaddu waa la socotaa in Mary la doodayso hadii ay ak fariisato Mark. Haddey macalimadu tuhmeyso sababta ey Mary ula doodeyso iney tahay in ey is tusto Mark, macalimaddu dhowr waxyaaboodba waa fali kartaa. Waxey fariisin kartaa Mary meel ka fog si aysan isu tusin Mark. Waxay kaloo tusi kartaa iyadoon la doodin macalimadda hab ay kula xiriiri karto Mark iyadoo dhiira gelineysa dabeecadda wanaaggsan.

Dabeecadda waxaa u talisa cirib dambeedkeeda

John wuu dagaalamay (dabeecad) sidaa daraadeed ayaa dugsiga looga ceyriyay (ficil dambeedkii ka soo

baxay dagaalka) Haduu John doonayo dugsiga, ee uu dabeecadiisa ka adagyahay dabadeed cirib dambeed ka soo baxaya ma jiro. Waayo wuu ogsoonyahay in dugsiga laga ceyrinaya haduu dagaalamo. Laakiin hadii uusan jecleyn dugsiga, waxuu u arkayaa dagaalku in uu yahay wax wanaagsan ileyn waa sabab uu guriga ku aado. Mar walba ee John doonayo in uu dugsiga ka tago dabeecad noocee ah ayey kula tahay in uu falayo?

Inta badan waxaan u baranay in aan ilmaha waxba ka qaban ilaa ay ku kacaan dabeecad darro, dabadeedna aan ciqaabno. Ciqaabtu ilmaha karti kuma yeeshaan. Waxaan ilmaha u ciqaabnaa in aysan ficil xumo ku kicin. Hadaanan barin ilmaha si aanan ciqaab aheyn ee ay ku joojiyaan ficil darada, waa sii wadayaan flaad xumada. Mar walba uu ilmahu ku kaco flaad darro, sabab ayuu uga dan leeyahay. Sababtaa daradeed ayuu u sii wadayaa ficil xumada.

Dadka intooda badan waxay isku raaceen in loo bahanyahay in wax ka soo gaaro marka ay ilmahu ku kacaan ficil darro. Laakiin waa in aan ku taqasusnaa in aan ilmaha barno habka ey ugu kici lahaayeen dabeecad wanaagga aan ka dooneyno. Haddaan ogaanno sababta u geyneysa ilmaha ficil darada, waxaan bari karnaa ficil wanaag uu ilmahu ku helayo waxuu ficil xumada ku doonayey. Dabadeed ilmahu waxay baranayaan in ay heli karaan waxa ey doonayeen iyagoon ficil darraan.

Waa maxay Qiimeynta Dabeecadda aassaasiga?

Qiimeeynta dabeecadda aassaasiga (Functional Behavoral Assessment) waa hab la isugu keeno warbixinno badan. Warbxinnadaa waxaa lagu ogaadaa, sababta u keenta ilmaha dabeecad darrada. Waxaa kaloo lagu ogaadaa, sidii looga hadli lahaa waxqabadka dabeecad darrada. Warbixinnada ka soo baxa qiimeynta dabeecadda aassaasiga, waxaa loo isticmalaa in lagu helo qorsho dhexdhexaadin dabeecad wanaag ah. Sharcigii 2004 ee waxbarashada gaarahaanneed ee dadka naafada ah waxuu si qaas ah noo farayaa, in ilmaha laga qiimeeyaa dabecada aassaasiga inta aan dabeecad darro awadeed looga bedelin halka ey dugsiga kaga sugan yihiin. Hase ahaatee, taa micnaheedu ma aha in qiimeeynta dabeecadda aassaasiga sababtaa keliya loo isticmaalo.

Sida sharcigu noo caddeynayo, waa in ilmaha laga qiimeeyaa meel walba oo lagu tuhmayo in ay naafo ka leeyihiin. Taasi waxaa loola jeedaa, hadii uu ilmahaagu leeyahay dhibaato dabeecad darro ah, oo qorshahii hore loo sameeyay wax u qaban waayo, waa in dib loo sii qiimeeyaa dabeecadooda si loo darso. Haddaad dareento in ilamhaagu dabeecad darradooda sii fara badatay, ama jawaabta kooxda ku qancin weydo, waxaad codsan kartaa qiimeeyn dabeecad assaasi in dib loogu sameeyo.

Waxaa jira sababbo badan ee u geeysa ilmaha dabeecad xumada. Waxey noqon kartaa jawiga ilmahu ku sugan yahay markaa, sida aalerjiga, boorka, raashinka, ama dhirta. Madax xanuunka, ilkaha oo xanuuna ama san boorkaba waxuu u keenaa ilmaha dabeecad xumo. Ilmaha qaarkood wexey leeyihiin cudurro wax u dhima dabcigooda. Sida (bipolar disorder ama ADHD attention-deficit/hyper-activity disorder) kuwaasoo u keena dabci is bedel badan ama dhug la'aan sal fudeyd leh. Kooxdu waxay masuul ka tahay in ay isu soo aruuriso warbixinnada caafimaadka ilmaha si loo fahmo sabta ku kalifeysa dabci xumada.

Dadka isu soo kooba qiimeeynta dabeecadda aassaasiga, habab kala duwan ayey isugu soo aruuriyaan warbixinnada ilmaha. Shaqaalaha dugsiga waxaa laga yaabaa in uu waalidka iyo ilmaha warbixin la yeesho. Waxaa indho indheyn lagu sameeynayaa ilmaha iyagoo meelo kala duwan jooga. Sida fasalka, halka ay raashinka lagu siiyo ama halka lagu ciyaarsiiyo. Waxey kaloo isu soo aruuriayaan warbixinnada ay ka dhiibaan macalimiinta iyo dadka kale ee ku shaqa leh ilmaha. Waxey darsaan qoraallada dugsigu ka qoray ilmaha iyo wax walba oo adiga waalidka ah ku siyaadin karto.

Marka intaa oo dhan l'a isu keeno, waxaa soo baxaya qiyaas ah sababta keenta dabeecad darrada. Qiyaastaa waa mid mutacalimeed oo ay sal u tahay warbixinadii kooxdu isu soo aruurisay. Dabadeed jawaabta ka soo baxda qiyaastaa ayaa loo isticmaalaa in lagu helo qorsho dhexdhexaadin dabeecad wanaag ah.

Dabeecadu waxay ku xirantahay mowqifka.

Dabeecadu inta badan waxay ku xiran tahay waxa agagaarada ilmaha ka dhacaya ama jawiga uu joogo. Waxaan hoos tusalo ugu soo qaadaneynaa sababaha keeni kara dabeecad xumada:

- ilmaha oo heshiin waaya
- tirada ilmaha fasalka ku wada jira
- xiriirka ka dhexeeya arddada ay fasalka ku wada jiraan
- fasalka inta uu la egyahay
- dawooyinka ilmahu qaataan oo is bedela
- sida hawsha dusigu u adagtahay

Waxyaabo kale oo ay ka mid yihiin cidda meesha joogta iyo howsha ay ka doonayaan ilmaha waa ku lug yeelan kartaa dabeecadda ilmaha. Dabeecad xumada waxay kaloo imaan kartaa, marka ilmahu careysan yahay ee uusan xamili karin hawsha laga doonayo ama jawiga.

Dabeecadu mowqifka ayey adeege u tahay

Dabeecad xumada sabab ayuu ilmahu ugu kacaa ama ayey u qabataa. Mararka qaarkood waxaan aragnaa dabeecad xumadu in ay timaado marka uu macalin ku meel gaar ah fasalka barayo. Markey taa timaado, waa in aan ka taxadirnaa in aan loo fikirin in ilmahu jecleeyn macalinkaa ama is tusayo saaxiibadii. Waxaa laga yabaa in ilmahu jecelyahay macalinkooda caadiga ah ee uu ka caroonayo marka eysan joogin. Ama uu ka didayo howsha macalinkaa cusub ka doonayo ilmaha. Ilmaha ka caroonaya macalinka cusub, waxay ku kacaan dabeecad daro si looga saaro fasalkaa ee loo geeyo meel ka dhib yar. Ilmaha qaarkood waxay doortaan ciqaab si looga saaro fasalkaa.

Nasiib darro waxaa ah, ciqaabaha lagu qaado ilmaha dabeecadda daran, kuma wada shaqeyso ardadoo idil. Tusaalo haddaan u soo qaadano, ilmaha lagu ciqaabo in ay fariistaan xafiiska maamulaha dugsiga. Taasi xal uma aha ilmaha dabeecad daradoodu ay intaa ka sii culustahay.

Ilmahu waxey falaan waa (dabeecadda) sababta ey u falaan waa (ficilka).Waxaa dhici karta in labadaa isku lug leheyn. Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu doonayaan in aad u dhug lahaato. Ilmaha dabeecadda daran waxuu ka habsaamayaa dugsiga si aad ugu dhug yeelato. Ilmaha kale ee caadiga ahna waxuu ku dadaalayaa inuu helo natiijyo wanaagsan xagga waxbarashada si aad ugu dhug yeelato. Haddaba labadaba sababta ficilkooda waa isku mid oo wanaag ayey kaa doonayaan (in ay waalidka soo jiitaan) halkii loo mari lahaa ayaa kala duwan moyee.

Waxyaabaha ka hor dhac'a lug bey ku yeeshaan Dabeecadda

Waxyaabaha ka hor dhaca inta aysan dabeecaddu imaan, lug ayeey ku yeeshaan. Inta uu fasalku la egyahay, tirada ilmaha ee fasalka, dhaqaaqa ama subaxi hore inta ay ilmuhu saaran yihiin baska waxa dhaca, ka hor dhacaa oo idil lug bey ku yeeshaan dabeecadda ilmaha.

Waa muhiim in la ogaado waxyaabaha keenaya dabeecad wanaagga iyo dabeecad xumada. Hadii ey waalidka iyo macalimiintaba garanayaan sababaha keena dabeecad darrada, iney sababahaa ka hor tagaan ama bedelaan waxay caawisaa dabeecada ilmaha. In siyaabo wanaag ku jiro wax loo baro waxay siyaadisaa wanaagooda. Sida iyadoo wax wanaagsan la siinayo marka ilmuhu ficnaan sameeyo, iyadoo loo sameeynayo waqti go'an maalin walba oo ay hooshooda ku qabsadaan, dhiira gelinayo ama hadallo wanaagsan lagu oranayo.

Talaabooyinka la qaato marka la sameeynayo qiimeeynta dabeecadda aassaasiga

Sharciga waxbarashadda gaar ahaaneed ee dadka naafada ah 2004, ma sharaxayo habka loo sameeyo qiimeeynta dabeecadda aassaasiga. Habku waxuu ku xiran yahay waxa ilmaha baahidiisu tahay. Hase ahaatee, dhowr talaabood oo qaas ah ayaa mar walba ka mid ah kuwa loo qaato qiimeeyntan. Habku waxuu ka bilaawdaa, in la isla arko dabeecadaha loo garanayo in ay khasab tahay in ay isbedelaan. Haduu ilmahu leeyahay dabeecado fara badan ee xun, waa in xoogga la saraa mid ama labada ugu qatarsan. Dabeecadahaa xun waxaa loo qeexayaa si uu qof walba fahmi karo. Talaabadahan hoos ku qoran waa kuwo inta badan dhaca oo aan tusaalo u soo qaadan karno:

1. In la garto ee la isku raaco dabeecadaha ugu qatarsan ee u baahan in ay isbedelaan.
2. In la ogaado kolka ay dabeecadahaasi yimaadaan ama eysan imaan. In la ogaado sababaha keena. Kooxdu su'aalo la mid ah kuwa hoos ku qoran ayey is weydiinayaan:
   - Maxaa u qaas ah meelaha jawigooda uusan dabeecadaha xun ilmahu ku muujineyn?
   - Meelaha uu mujinayo dabeecadaha xun sidee bey uga duwan tahay meelaha kale? Ma ku xiran tahay xiriirka heshiiska ka dhexeeya macalinka iyo ilmaha? Ma dhici kartaa in ay dhibaatadu keeneyso tiarada ardeyda ama howsha laga filayo ilmaha? Ma dhici kartaa in ay tahay waqtiga maalinta la marayo iyo dabeecadda ilmahu dareemayo? Ma jiraa wax dhibaato ah ee ka dhacay baska maanta ama is afgaran waa in uu ka dhacay fasalka dibadiisa?
   - Ma u badan tahay in dabeecaduhu meela qaas ah ka dhacaan, ama mar qaas ah. Maxaa sii dhiira geliya dabeecad xumada?
3. Waxaa la isu soo aruuriyaa warbixinno walba oo suuro gal ah ilmaha halka uu marayo.
4. Waxaa la soo saarayaa fikrad lagu qiyaasayo sababta ay dabeecad darrada ku timaado. Qiyaastaa waa mid mutacalimeed oo ku xog leh wargelinadii la isu soo aruuriyey. Qiyaasta waxey naga caawineysaa in aan

ka digtonaanno sababta iyo halka ay u badan tahay in dabeecad darrada ka timaado, iyo meelaha ay ugu yartahay in eysan ka imaan.

5. In aan isla garano dabeecaddo kale ee wanaagsan oo aan barno ilmaha, kuwaas oo uu ku gaarayo mowqifkii uu ula jeeday kuwa xun.
6. Tijaabi fikradahaa. Kooxdu waxay la imaneysaa oo ay isticmaaleysa dabeecad-dhexdhexaadin wanaagsan oo lagu qorayo ilmaha qorshahooda waxbarashada gaar ahaaneed.
7. Cabir horumarka dhexdhexaadintaa. Dib ugu noqo marka loo bahanyahay in wax laga bedelo ama la sii wanaajiyo.

Hadii ey ilmahu leeyihiin dabeecad qatar gelineysa nafsadooda ama ilmaha kale, waxey u baahan yihiin qorsho qatar kahor tag ah. Qorshaha qatar kahor tegida waa in horey loo sii dejiyaa inta eysan qatartu imaan. Kooxdu waa in horey u garataa dabeecadaha qatarta ah iyo waxa ilmaha iyo iyaguba fali lahaayeen hadii ay dabeecaddaa qatarta timaado. Macalinku haduu horey u leeyahay qorsho ah waxa uu fali lahaa marka ilmaha xaaladda xun ku jiro, wuu ka caawini karaa ilmahaa xaaladda xun uu ku sugan yahay markaa.

Qorshaha Dhexdhexaadinta Dabeecadeed

Qorsho dabeecad dhexdhexaadin haboon (inta badan loo yaqaan qorsho caawinaad dabeecadeed ama qorsho dhexdhexaadin wanaagsan) waxaa loo isticmalaa in lagu baro ama lagu xoojiyo dabeecad wanaag. Sida u badan, kooxda ayaa u qorsheysa ilmaha. Inta badan qorshaha waxaa ka mid ah:

- tababar kartiyeed oo loogu tala galay in lagu siyaadiyo dabeecad haboon.
- ka bedelid fasalka ama jawiga laga bedelo ilmaha si loo joojiyo ama looga hor tago dabeecad xumo.
- hab looga bedelo ilmaha dabeecad xumada oo ay ku raadinayeen wax qaas ah, ee la baro hab wanaagsan oo ay ku heli karaan waxaa qaaska ah.
- In dhiira gelinayo marka ilmahu falo dabeecad haboon.

Qorshaha dhexdhexaadinta dabeecadda wanaagsan ma aha qorsho lagu ogaanayo waxa u cirib dambeeya marka ilmahu ku xad gudbo qeynuunka u deggan dugsiga. Kaasi waxaa loo yaqaan qorsho aqlaaq ama qorsho ciqaabeed.

Khidadka Aqlaaqda Dugsiga

Kooxda khorsheysa waxbarashada gaar ahaaneed ayaa fareysa in ilmaha marka ay ku kacaan dabeecad darro lagu qaado qeynuunka ciqaabta dugsiga degan ama in cirib dambeedkoodu noqdo mid ka duwan kan dugsiga u degan. Go'aankani waa in uu ku xog lahaadaa qiimeeynta iyo dib ugu noqoshada diiwaanka ilmaha. Taasoo lagu daraya talaabooyinka dugsiga horey uga soo qaaday ilmaha. Qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed ee ilmaha ama qorshaha dhexdhexaadinta dabeecadda waa in uu ku taqasusaa sidii ilmaha karti loogu yeeli lahaa.

Mararka qaarkood xogsashada qeynuunka aqlaaqda dugsiga laguma guuleysto in ilmaha laga saxo dabeecad darrada. Ilmahu ma bartaan waxa uu dugsiga ula jeedo ciqaabtaa sida ilmaha oo dugsiga laga ceyriya. Waxaa laga yaabaa, in ilmahu ciqaabtaa u arkaan mid wanaagsan oo ey istusayaan ilmaha kale. Markay arintu sidaa noqoto, ciqaabtu waxba ma tarto, mana saxi karto dabeecad darrada.

Su'aasha su'aalaha ugu haboon ee waalidku weydiin karaa marka uu shaki ka qabo ciqaabta dugsiga u soo jeedinayo ilmahooda waxay tahay "xaggey ku taallaa warbixinta muujineysa in ciqaabtaa ku shaqeynayso ilmaheyga" Ileyn go'aannada waxbarashada gaar ahaneed waxay ku sal leeyihiin warbixinno. Haduu dugsigu doonayo in uu istimaalo ciqaab qaas ah, waa in uu hayaa warbixinno muujineysa in ciqaabtaa shaqeyneyso. Haddaan tusaalo u soo qaadano, hadii ilmahaaga si joogto ah looga ceyriyo dugsiga dabeecad darro daraadeed, ceyrinta miyeey saxdaa dabeecad darada ilmaha?

Sharciyada aanan loo dulqaadaneyn ku xad gudubkooda

Dugsiyada intooda badan waxey leeyihiin sharciyo ku xad gudubkooda hadii ay ilmahu geeyso aqlaaq darada qaarkeed aan loo dulqaadaneyn. Sharciyadaa kuma haboona ilmaha oo dhan. Hadii ilma laxaad l'a ku xad gudbo sharcigaa, waxaa laga yabaa in cirib dambeedka ka soo raaca uusan ku habooneyn. Waxey ku xiran tahay halka uu ilmahaa naafadiisa gaarsiisantahay. Cirib dambeedka ay sabab u tahay dabeecad darradda waa in uusan noqon mid takooraya ilmaha naafada ah. Kooxda qorsheeysa qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed ayaa ka masuul ah in ey qeexdo in sharciga u qoran degmada dugsiga loo bedelayo ilmahaa, ama in ilmahaa ciqaabo ka duwan kuwa sharciga dugsiga u yaalla lagu qaadayo. Waxaa loo bahan

yahay in falan la raaco lagu qoro qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed si loo dhex dhexaadiyo dhibaatooyinka uu ilmaha ku qabo raacidda sharciga dugsiga yaal.

Inkastoo shaqaalaha dugsiga qaarkood dooneyn in qofna laga takooro sharciga dugsiga u deggan ee loogu tala galay arddada oo dhan, takooridu mararka qaarkood waa lagama maarmaan. Arddada qaarkood aan dabcigooda u masaamaxeyn in ay raacaan sharciga u degan dugsiga, waxey u baahan yihiin sharciyo u gaar ah oo ku haboon, si loogu dhiiro geliyo adaab wanaag.

Sharciga dalka mareykanka u yaal, ciqaabta kaa soo gaarta jebinta sharciga, waxay inta badan ku xiran tahay qiimeeynta halka aad sharciga ku jebisay. Dugsiyadu se waxay leeyihiin hal sharci oo wada qabta arddada oo dhan si walboo baahidoodu tahay. Halkaa sharci ayuu dugsigu ku qaadi karaa arddada oo dhan. Waalidku waa in uu si taxadir leh uga fiirsadaa sharciyada dugsiga u deggan si ay u ogaadaan in ilmaha u baahan yahiin hab doorin.

Tusaalooyin ah hababka loo maro dhexdhexaadinta dabciga

Dugsiyadu waxey raacaan hababka soo socda si ay uga hor tagaan dabeecad darrada iyo si ey u baraan ilmaha karti dabeecad wanaag leh.

Istaag, Nasso, iyo Fikir waxay bartaa ilmaha sida looga fikiro dhibaatada markaa haysata iyo sida uu xal ugu helo. Ilmahu waxey branayaan talaabooyinka soo socda:

1. Sharax dhibaatada.
2. Go'aanso xaggey dhibaatadu ka timid.
3. Ka fikir inta nooc ee kuu surowda in aad u xaliso dhibaatada.
4. Dooro mid ka mid ah xallalkaa oo tijaabi.
5. Isticmaal midkaad dooratay.
6. Qiimee in aad ku guuleysatay.

Marka ey ilmahu fahmaan talaabooyinkaa, iyagoo mid-mid dhexdooda isugu tababarta, waxey u noqoneysaa talaabooyin caadi ah. In la baro ilmaha sida ay xal ugu heli lahaayeen dhibaatooyinka (sida gacmaha oo ey isla dhacaan, codka oo ay dheereeyaan) heysta.

Dafiraad ula kac ah (Planned ignoring) waa mid la addeegsado si loo joojiyo dabeecadaha la dhibsado. Tusaalo haddaan u soo qaadano, ardayga qeylida badan ama ka dhex gala hadalka baraha oo hadlaya fasalka gudahii si uu isu tuso macalinka, ama ardeyga aan diyaar u eheyn in uu wax barto. Dabadeed dafiraadu waxay tartaa in uusan ilmahu gaarin mowqifkiisii. Haduu ardeyga aadaabta daran mowqifkiisu ahaa in uu istuso macalinka, dabadeed dafiraadu waxay ka hor tageysaa ardaygaa mowqifkiisa. Ilaa marka dambe uu ardeygaa joojiya dabeecad darradaa. Dafiraaddu waxey kaloo wax tartaa waalidka marka uu ilmaha yar ku kacayo adaab darro istusid ah aan sidaa u sii culseyn. Dadka waaweyn intooda badan waa ku adagtahay in ey dafiraan dabeecad darada, weliba marka uu ilmahu ka dhexgalayo qofkaa waxa uu qabanayey. Sidoo kale ilmahana dhibka waa sii siyaadiyaan inta eysan joojiyaan.

Dafiraadda ula kaca ah maha mid ku haboon dabeecaddaha aad u xun. Weliba marka ay ilmaha kale ku qoslayaan dabeecad xummada uu qofka weyn isku deyaya in uu dafiro. Dabeecadaha qaarkood oo aad u xun, oo ey ka mid yihiin dooda, waxey isu bedeli kartaa mid qatar ah. Ma suurowdo in la dafiro dabeecadaha nocaa ah. Dafiraadda ula kaca ah waa in aan marnaba la isticmaalin marka dabeecad daradu qatar tahay. Marka ilmahu koraan oo ey raadinayaan in ey is tusaan saaxiibadood, dafiraadda ula kaca ah marnaba kuma shaqeeysa.

Ka hortagga baaqa ah (Preventive cueing) (waxaa kaloo loo yaqannaa tilmaanta kaladhexgalka) waxey ilmaha la socodsiisaa marka ey falayaan waxyaabo aan la aqbali karin. Macalinka ama waalidka waxa uu u baaqi karaa ilmaha marka ey ku kacayaan waxyaabo eysan qaadicsaneyn ama ka doonayo in ilmaha joojiyaan falanka ey kacayaan markaa. Baaqaa waxuu noqon karaa: iyada oo madaxa lula, iyadoo ilmaha si gaar ah loo eega, loo tilmaama kursi uu ilmahu fariisto ama iyadoo faraha la isla dhaca. Marka baaqaa ka hortagga ah la isticmaalayo, waa muhiim in aan loo qoslin ama weji farxad leh la tusin ilmaha. Baqa ka hor tagga waxaa loo yeeli karaa talaabooyin kala duwan oo ey ku xiran tahay inta goor uu ilmahu ku kacay ficil xumadda, ama ficilka qatarta uu leeyahay. Hadaan tusaalo uga soo qaadano, gacanta oo looga baaqo marka ugu horeysa. Haduu ilmahu ku laabto ficilka, eegmo iyo madaxa oo la lula la isugu daro.

Xukunka ku dhowaanta (Proximity control) micnaheedu waa mid uu baraha ama qofka weyn ku dhowaanayo halka ilmaha ku sugan yihiin si naxariis leh. Haduu macalinku baaq ku soo jeedin waayo ilmaha, waxuu ku dhowaan karaa ama uu is taagi karaa halka uu ilmaha fadhiyo oo uu casharka ka bixin karaa.

Xukunka taabashada (Touch control) Micnaheedu waa taabasho aan ilmahu wax ka qabin ee uu macalinka ku duwayo ilmaha isagoon afka ka hadlin. Waxaa loo

isticmaalaa in lagu duwo ilmaha xagga dabeecad wanaagga. Hadaan tusaalo uga soo qaadano, macalinku waxuu si fudud u taaban karaa ama gacanta garabka uga saari karaa ilmaha si uu ugu hago in u dib ugu laabto kursiga. Awoodda taabashada waa in aan marnaba la isticmaalin taduu ilmahu dhibsanayo ama xeerka dugsiga u degan ogoleen. Hadii diiwaanka ilmahu muujinayo in ilmahaa dhibaato horey loogu geystey, la falaad xumeeyey, dhib horey u soo maray ama maskaxda wax ka qaba, in aan la isticmaalin taabasho. In dhaqtar ama dhaqtarka madaxa faray moyee.

Kaftan (Humor) Kaftanku waa in uu ku jeedaa macalinka ama waxa laga hadlayo. Marnnaba in aan ilmaha lagu kaftamin. Kaftanku waxaa loo isticmaali karaa in lagu yareeyo xiisada marka ey kacsantahay oo ilmaha loo jeediyaa meel kale. Kaftanka waa in marnaba loo isticmaalin si ilmaha hoos u dhigeysa ama ku dhiira gelineysa ilmaha kale in ey ku maadeystaan ilmahaa.

Digniin aan hadal leheyn (Nonverbal warning) U ogolow ilmaha fursad ay isku saxaan adigoon ku dhawaaqin ama ka tilmaamin ardeyda kali. Tusaalo hadaan u soo qaadano, in macalinku saarayo kursiga ilmaha waraaq midab u baaqeysa leh ama tiro faraha kor u taagaya marka ilmahu wax aan macalinka raali ka eheyn falo.

Si gaar ah u edbi (Discipline privately) Ilma badan waxey u arkaan in macalinku la tartamayo ama uu u caga jugleynayo haduu isku deyo in uu ku edbiyo ardada kale hortood. Ilmaha inta badan loogama guuleysto taa, xattaa haddey ogyihiin in dhibaato ka soo gareysa. Dadka dhalinta yar sumcad bey u tahay in ardeyda kale hortood ku diidaan macalinka waxuu faray. Waxey u badan tahay in ilmahu aqbalo adaabta marka gaar loola baxo ee aan lagu edbin ilmaha kale hortood.

Oraah wanaagsan (Positive phrasing) waa ogeysiinta ilmaha la ogeysiinaya wanaagga ka soo baxa marka ey aqlaaq mudan sameyaan. Waxey u dhawaaq egtahay mid sahlan, laakin ma aha mid sahlan. Waalidka iyo macalimiinta waxey u barteen in ey xoogga saaraan adaab darada ilmaha. Digniinta adaab darada ayaa inta badan ka sahlan sharaxaada adaab wanaaga iyo waxa ka soo baxa. Hadaan isu bar bar dhigno:

Oraah wanaagsan: "Haddaad dhameyso wax aqriska inta aan fasaxa gaaban ee xisadda la gaarin, dhamaanteenba dibadda ayaan ciyaar u aadeynaa"

Oraah aan wanaagsaneyn (Negative phrasing): "Haddaad dhameyn weydo wax aqriska inta aan fasaxa gaaban ee xisadda la gaarin, fasalka ayaad fadhineysaa illaa aad dhameyso"

Oraahda wanaagsan waxey ilmaha bareysaa wanaag in uu ka soo baxayo marka ey wax wanaagsan qabtaan. Taasi waxey ka caawineysaa in ey dabeecad darada xal u helaan.

Fariinta ku kooban shaqsiga (I-message) Sida uu ku sharaxay qoraagii Thomas Gordon buugii uu qoray 1974 oo la oranayey Teacher Effectiveness Training, waxey ilmaha ka caawisaa in ey bartaan aqlaaq darrada ey geysanayaan sida ey u dar yesho dadka kale. Waxuu kaloo sharaxayaa muhiimadda ey leedahay in qofku ka masuul noqdo dabeecadiisa. Tusaalo hadaan u soo qaadano, waalidka ama macalinka waxuu oranayaa "Waan ka caroonayaa markaad waxaa fasho..." ma oranayo "Qof xun baad tahay hadaad waxaa fasho..."

Markuu ilmahu xiriir wanaagsan la leeyahay waalidka iyo macalinka, fariinta ku kooban shaqsiga (I-messages) waxey fahamsiineysaa ilmaha aqlaaq darrada ey geysanayaan, in ey dar yeeleyso dadka kale. Dabadeedna ilmahu ma doonayan in xiriirkaa wanaagsan wax u dhimaan. Hase ahatee, haduu ilmuhu jecleyn macalinkaa, Fariinta ku kooban shaqsiga I-statements dhibaato ayeey noqon kartaa. Waxey noqon kartaa mid uu ilmahu isticmaalo si uu si siyaado ah macalinka u sii dhibo.

Habeynta dabeecadda (Behavior shaping) waxey ogolaaneysa in ilmaha oo idil fali karin boqolkiiba boqol hawsha laga doonayo. Hadii waraaqaha ilmaha laga doonayey in uu maalin walba dhiibaa horey u dhiibi jerin, ma aha in ilmaha hadda laga filaa in uu sameeyo boqolkiba boqol. Taasi ma aha mid suuro gal ah. Waa in la abaal mariyaa marka uu la yimaado waraaqaha ee lagu dhiiro geliyaa mar walbaa uu sameeyo. Taasi waxey ilmahu ku baranayaan in ey hawsha sii wadaan oo ay karti u yeeshaan.

Jadwal fasiix ah (Clear routine) iyo iyadoo maalin walba lala socodsiiya howsha laga filayo, waxey ilmaha ka yareysaa walaaca iyo cabsida. Macalimiinta sharciga ku dhejiya derbiga, dibna ugu noqda maalin walba, waxey muujiyaan dabeecadda laga doonayo ilmaha maalintaa.

Boogaagtii laga soos guuriyey (Bibliography)

This handout was based on research-validated best practices in the fields of psychology and education. Publications utilized in the development of this information sheet include:

Bullock, L.M., & Gable, R.A. (Eds.) (1997). *Making Collaboration Work for Children, Youth, Families, Schools, and Communities*. Reston, VA: Council for Children with Behavioral Disorders & Chesapeake Institute.

Center for Effective Collaboration and Practice (1998). *An IEP Team's Introduction to Functional Behavior Assessment and Behavior Intervention Plans.* Washington, DC: American Institutes for Research.

Fisher, Jr., W.P. (2004). *Thinking about Validity: The Case of Functional Assessment.* Rasch Measurement Transactions, 18(1), 964-966.

Gable, R. A., et al. (1997). *Individual and Systemic Approaches to Collaboration and Consultation.* Reston, VA: Council for Children with Behavioral Disorders.

Kerr, M.M., & Nelson, C.M. (1998). *Strategies for Managing Behavior Problems in the Classroom* (3rd edition). New York: MacMillan.

Lewis, T. J. (1997). *Teaching Students with Behavioral Difficulties.* Reston, VA: Council for Exceptional Children.

Reed, H., Thomas, E., Sprague, J. R., & Horner, R. H. (1997). *Student Guided Functional Assessment Interview: An Analysis of Student and Teacher Agreement.* Journal of Behavioral Education, 7, 33-49.

Sugai, G. M., Bullis, M., & Cumblad, C. (1997). *Skill Development and Support of Educational Personnel.* Journal of Emotional and Behavioral Disorders, 5, 55-64.

Additional Contact Information

For additional information on positive behavioral interventions and functional behavioral assessment as well as related topics, contact the following:

ALLIANCE National Center

8161 Normandale Boulevard
Minneapolis, MN 55437-1044
952-838-9000, Voice
952-838-0199, Fax
952-838-0190, TTY
888-248-0822, Toll-free National
alliance@taalliance.org
www.taalliance.org

Center on Positive Behavioral Interventions and Supports

1235 University of Oregon
1761 Alder Street
Eugene, OR 97403
Voice (541) 346-2505
E-mail: pbis@oregon.uoregon.edu
www.pbis.org

American Institute for Research

1000 Thomas Jefferson Street, NW
Washington, DC 20007
202-403-5000
E-mail: inquiry@air.org
www.air.org